


DEGGANAASHO WAARTA

LEH HOYGA



Mashruuca "wadajir u waara"



Kala soocidda



BILLAW



Ma qashin cuntabaa?

Ma in la tuuraa?

HAA

MAYAA

Ma joornaalbaa mise baakad?

HAA

Ma qashin khatar ahbaa mise qashin koronto?

MAYAA

HAA

Waxaa la geynayaa
XARUN DIB U CELIN (ÅVS)



Ma geli karyaa fuustada cagaaran?

HAA

MAYAA

Ma wax guban karabaa?

MAYAA

HAA

MAYAA

Waxaa la geynayaa
XARUN DIB U CELIN (ÅVC)



DIB U ISTICMAALID

Dib u cusboonaysii, sii iibi, bixi ama isticmaal cuntada hadhaaga ah



Weelal kala-soocid oo kala duduwan

Guriga ku diyaarso wax walxaha ku kala sooccid noocyada kala duwan ee Baakadaha markaas way fududaaneysaa in lagu tuuro qolka qashinka gadaal dambe



Walxaha kala sooc-sooc

U qaybi baakadaha ka samaysan walxo kala duduwan. Hal baakadda caanaha waxaa loo soocayaan sidawarqad ahaan halka gufku yahay caag



Biyo raaci baakooyinka

Dhegdhegga biyo ka raaci baakooyinkanadaafadda awgeed. Waa ku filantahay in aad si fudud u biyo raacisid, baakaduhu uma baahna in ay si aad ah nadiif u ahaadaan



Baakadda yarey

Meel bannaan ku badbaadi adigoo laablaabaya ama fidinaya baakadaha. Waxay taasi kuu badbaadinaysaa boos adiga iyo weelka qashinka labadaba, taas oo keeneysa in aan loo baahan in inbadan la faarujiyo weelka



Qashinka cuntada beddelihay in badan

Beddel bacda warqadda ugu yaraan hal mar saddaxdii maalinba. U daa haraaga cuntadu si fiican ha ugu shubmee bullaacadda ka hor inta aan lagu tuurin bacda warqadda



Iska ilaali caag

Hubi in uusan caag la gelin bacda bunniga ah iyo in aadan ku duuduubin bac balaastiik ah. Balaastiiggu wuxuu qarribayaa habkaxarun dib u warshadayn shiidaanka wuxuuna gacan ka geysan karaa faafitaan balaastiigga ee diciicada



Qashinka khatarta ah

Qashinka khatarta ah wuxuu waxyello u leeyahay diciicada iyo daaka labadaba. Sidaa darteed, had iyo jeerba gey

Si sax ah u maarey subagga cuntada



Subaggu wuu adkaadaa marka uu qabowyo




Wuxuu dhaawacaa tubooyinka haddii lagu shubo
bullaacadaha



Subagga cuntadu wuxuu ku xarkagaa tuboobbooyinka
bullaacadaha, taasoo keeni karta daadasho


Xalka wanaagsani waa in subagga cuntada lagu shubo dhallada caadiga ah ee PET-ka



Meesha dhar dhaqidda



Beddel luqadda adigoo riixaya calanka ku jira liiska





Qiyaasidda oomada

Qiyaastii 30 ml (2 qaado-cunto) oo oomo ah ayaa loo baahanyahay mashiinka buuxa. Oomada oo laga badsho ma ka dhigayso dharka mid ka nadiifsan marka kale, taas beddelkeeda cambaar iyo finin ayey u keeni kartaa qofkii uu taabto dharkaasi



Dufta ka saar

Hubi inaad dufta ka saartid qallajiyaha iyo armaajada qallajinta ka dib markaad isticmaasho mishiinnada



Waxaa fiican inaad ka fogaaato jilciyaha marada

Waa wax caadi ah in la isticmaalo jilciye dhar marka dhar la dhaqayo, laakiin dhab ahaantii maaddadaas looma baahna. Waxaa ku jira jilciyaha marada kiimikoyinka ku shubmaya bullaacaddabiyyaha oo xitaa dhaawici kara dharka la dhaqayo



Heerkul sax ah

Dharku xitaa maanta nadiif wuu ku noqdaa heerkul hoose. Dharku wuxuu badanaa ku roonyahay inaan lagu dhaqin heerku aad u sarreeya oo aan loo baahnayn



Ha dhaqin haddaaney lagama maarmaan ahayn

Waxaa jira waxyaabo la sameyn karo si loo yareeyo tirada dharka ku jira dambiisha dhar dhaqidda. Tusaale ahaan, gacmaha ayaa dhibcaha wasakhda looga goyn karaa, asaa lagu wari karaa dibadda si looga saaro urka xun. Waxay taasi yareyneysaa duugoobidda dharka, waxyna keydineysaa tamarta



Gadaashaada ka nadiifi

Hubi inaad nadiifiso ka dib markaad isticmaashay qolka dharka lagu dhaqdo. Waxay u fiicnaan doontaa qofka kugu xiga ee halkaas imaan doono



Ixtiraam wakhiyada dhaqidda

Marka waqtiga dhaqiddu dhammaato waa in mashiinnadu ay faaruq yihiin, diyaar u yihiin in uu isticmaalo kiraystaha xiga

Nadiifinta



Nadiifi meesha biyuhu galaan iyo biyo xirka

 Bostaden
För ett bättre Umeå



Nadiifi qalabka hawo-qaadista



Oomada

Waxa ay inta badan ka kooban tahay kiimikooyin badan oo deegaanka iyo caafimaadka waxyelaya



Bra Miljöval



Dhulka shumucu saaranyahay



Huufareyn oo xaaq dhulka hor iyo horraanba



Kaliya qoyaan tirtir dhulka marka loo baahdo

- Isticmaal xaaqin goyan oo kaliya



Ka fogow:

- Biyo kulul
- Saabbuun (wuxuu sameynayaa xuub axaleed subag ah)
- Isticmaalka maaddoojin wax lagu dhaqo oo fara badan



Isticmaal maaddo dhexdhexaad ah oo wax lagu dhaqo, tusaale; oomada alaabta lagu dhaqo iyo biyo qandac ah



Dhul alwaax la saaray



Huufareyn oo xaaq dhulka hor iyo horraanba



Kaliya qoyaan tirtir dhulka marka loo baahdo

- Dhulka alwaaxa la saaray wuu u nuglaan karyaa biyaha
- Isticmaal xaaqin goyan oo kaliya



Ka fogow:

- Biyo kulul
- Saabbuun (wuxuu sameynayaa xuub axaleed subag ah)
- Isticmaalka maaddooyin wax lagu dhaqo oo fara badan



Isticmaal maaddo dhexdhedaad ah oo wax lagu dhaqo, tusaale; oomada alaabta lagu dhaqo iyo biyo qandac ah



Daryeel guriga!

Waxaad u baahan kartaa inaad lacag bixiso haddii ay jiraan wax u baahan sameys ama hagaajin

Waxay waxaasi tusaale ahaan noqon karaan:

 Guriga waa in la nadiifiyaa haddii ay jirto in sigaar lagu dhex

 cabay

 Waxyeellada biyaha ee uu kiraystuhu sababay

 Albaabbo iyo daaqado dhaawacan

Quful beddelid haddii fure lumay



Badbaadada dabka



Jaranjarada waa in aysan waxba oollin



Dab ka dhasha
wax la dubayo oo
la illoobay



Dab ka dhashay karis
qallalan

Koronto



Korontada guriga

- Haddii shay shaqayn waayo, hubi fiyuuska ku jira saacadda korontada
- Ha isticmaalin meel barees la surto oo dhaawacan ama dabacsan
- Ha isticmaalin hana dayactirin alaabta korontada ama fii looyin jaban
- Doobbiyabarees ama wax la mid ah ha u jiidin musqusha



Isticmaalka tamarta



Heerkulka gudaha

- Shirkadda guryuhu waxay isku dayaysaa in ay heerkulka gudaha ku hayso 20 – 21 darajo sanadka oo dhan
- Heerkulka waa la saameyn karaa haddii:
 - Hiitarka lagu daboolay, tusaale ahaan, fadhi ama kabadh. Ugu yaraan 10 - 15 cm u dhixeyso hiitarka iyo alaabta guriga
 - Daahyadu waxay daboolaan dareemaha heerkulbeegga. Sidaar darteed u jiid daahyada dhinac haddii ay ku aaddanyihiiin hiitarka
 - Caagga cufidda wareegga daaqadda iyo albaabka balakoonka oo go'go'an. U sheeg waardiyaha xaafadda haddii ay u baahanyihiiin in la dayactiro



Aqal qabow xagaaga



Maalintii kuleylka dibadda ku celi

- Deji beershiyaanaha ama daahyada
- Daaqadaha/albaabbadu ha xirnaadaano maalintii marka ay ugu kuleyl badantahay
- Isticmaal marawaxad si ay hawadu ugu wareegto
wareegto guriga gudihiiisa



Guriga qabooji habeenkii

- Hawada u fur fiidadkii iyo habeennada oo keliya
- Abuur hawo dhexmarta guriga



Ka fogow ilaha kulaylka gudaha

- Iska ilaali inaad isticmaasho foorno, shoolad iyo makiinadda weelal dhaqidda marka ay ugu




Adigu is qabooji

- Cab biyo badan
- Ku buuxi qaboojiyaha baraf si aad isugu qaboojiso
- Ku qubeysa biyo qandiir ah ama qabow
- Biyo qabow ku qoy kala goysyada gacmaha
- Qoorta ama foolka ku qabooji shukumaan qoyan



Daboolka saar

Isticmaalidda kirliga iy o digsiyada daboolka leh waxay kaydisaa tamarta. Xusuushow inaad isticmaal saxannada shooladda kuleylka ka dib!




Wax stand-by ah ma jiraan

Qalabka stand-byga ku jira wuxuu keenaa inta u dhaxaysa 10 ilaa 20 boqolkiiha korontada qoyska. Ku xidh dhawr qalab fara badan hal doobiyabarees, si aad si fudud ugu awooddo inaad habe enkii demiso



Cun cagaar badan

Dhowr jeer oo aad hilib cuni lahayd todobaadkii ku beddel cuntada khudrad ah sidaas waxaad si fiican ugu dhimaysaa wasakhda cimilada u daran ee cuntada ka dhalaneysa. Sidoo kale isku day inaad tuurto cunto yaristicmaalayaa tamar Maanta qiyas ahaan rubuc ka midkataa isagoo shaqeyneyn. ah cuntadayadu waxay u dhamaataa qashin qubka



Maalintii cabbeysyo

Ha cabbeyn taleefankaaga gacanta ama kombiyutarka habeenkii - waa marar dhif ah marka ay u baahanyihiin waqtidheer. Ha illoowin inaad jaarjarka dabadeed ka saartid, wuxuu



Degdeg u haweyy

Waxaa fiican in si degdeg ah hawada loogu furo guriga oo si fiican loo haweyyo marka loo taas eego in daaqaddu yara furnaato. Haddii uu hiitar ku hoos yaal daaqadda aad hawada u fureysid - xir inta aad hawada guriga u fureysid




Buuxi mashiinka

Markaad alaab iyo dhar dhaqeysyo, si fiican u buuxi mashiinnada doorana heerkulka ugu hooseeya ee suurta galka ah



Ku dhalaali qaboojiyaha

Soo saar cuntada barafaysan wakhti fiican ee ha ku dhalaasho qaboojiyaha. Sidaas ayaad tallaajadda ku hayneysaa qabow iyadoo gebi ahaanba wax kaaga bixin



Si fiican u nadiifi qaboojiyaha

Hubi in heerkulku u saxanyahay tallaajada iyo qaboojiyaha. Barafka ka baabi'i sanadkii hal mar. Si aad u badbaadsato tamar dheeraad ah boorka ayaad ka jafi kartaa ama waad huufareyn kartaa shabaqa xagga dambe ah



Isticmaalka biyaha



Jelemed biyo tallaajadda ha kuugu jirto

Halkii aad biyaha tubbada furi lahayd muddo dheer mar kasta oo aad buuxineyso koob biyo ah waxaad qaboojiyaha ku haysan kartaa jelemed biyo ah




Si caqli ah alaabta u dhaqo

Alaab ha ku hoos dhaqin biyo socda. Isticmaal biyo-xirka ee ku dhaq alaabta waaskada oo buuxda halkii ay biyuhu iska socon lahaayeen




Dhaqso u maydho

Qubeyska 10 daqiico ah wuxuu cunayaa qiyaastii 120 liitar oo biyo ah. Isku day inaad waqtii gaaban qubeysato iyo inaad xirto qasabadda inta aad saabuunka ismarineysid



Si sax ah u biyo raaci

Musquusha biyaha ku fur oo keliya kaadida, xaarka iyo warqadda musquusha. Wershaddanadiifinta looma samayn in ay nadiifiso kiimikooyinka, haraaga daawada, suufka ama alaabta nadaafadda



Si habboon u qiyaas

Si loo yareeyo inta kiimikooyinka ee ku jira biyaha - hubi inaadan si aan loo baahnayn u isticmaalin dawooyinka wax lagu dhaqo oo badan iyo in ay ku suntanyihii bii'o u fiicnaan



Qasabadda biyaha xir

Hubi in tubbada biyuhu ay xirantahay inta aad tusaale ahaan ilkha cadayga marineysid, saabuunna gacmaha marsaneysid



Ku waraabi biyaha roobka


Haddii ay kuu suurta galeyso - ururso biyaha roobka ee u isticmaal waraabinta dhirta guriga gudihiisa iyo dibaddiisa labadaba

Waxyeellooyinka
biyaha ee guriga



Waxyeellooyinka biyaha iyo sida looga fogaado

- Waxyeellooyinka biyuhu waxay guriga ku keenaan burbur iyo bii'o nololeed oo aan caafimaad qabin
- Lacag aad u fara badan ayaa ku kaceysi in wax laga qabto waxyeello biyo




**Khatarta waxyeellada biyaha ee dhulka haddii
baraf la dhalaalinayo
waxay dhacdaa iyadoon la arkeyn**



**Waxyeellada biyuhu waxay imaan karaan
haddii aan godka biyaha saara ee
qaboojiyaha la furin**




Dalool ha ka samayn
lakabka cufeynta!



Waxyeellada biyuhu waxay iman kartaa haddii
tubbada qubayska loo isticmaalo meel ka baxsan
goobta qubeyska, tusaale ahaan; ku nadiiifinta
gidaarrada iyo dhulka



Makiinadda weel dhaqidda waa in si xirfaadeysan
loo rakibaa. Haddii kale, waxaa imaan karaa
waxyeello biyo



**Waxyeello biyo oo ka dhasha
daaqad furan iyadoo roob
da'ayo**

Khalad-ka warbixinta



Sida aad u soo sheegeyso khaladka

- Waa muhiim in isla markiiba la soo sheego cilladaha marka ay wax dhacaan ama u baahan yihiin in la hagaajiyo
- Wuxaad warbixinta cilladda ku soo gudbineysaa bogga intarneetka ee Shirkadda Guryaha
 - Wuxaad heleysaa adigoo adeegsanaya "Boggagayga"
 - Geli macluumaadka la dalbanayo. Fadlan soo dir sawirka dhibaatada muujinaya
 - Waardiyaha xaafadda ayaa markaas kugu soo warcelin doona



Hagaaji naftirkaagu khaladaadka ugu badan ee caadiga ah

Waxaa jira wax badan oo aad sameyn karto si aad uga hortagto in khalad dhaco. Qaar ka mid ah cilladaha ugu badan ee caadiga ah adiga naftirkaaga ayaa wax ka qaban kara. Waa kuwan qaar ka mid ah taloooyinka:


Musqusha qubeyska

- Haddii ay jirto xannibaad saxanka wijir dhaqa ah, hubi shaandhada iyo biyo-xannibaha ka hor inta aanad cillad soo sheegin.
- Haddii ay jirto xannibaad ku timid meesha biyaha qubeysku galaan, ka nadiifi timaha iyo wixii la mid ah, xagga sare shabaqa iyo xaggiisa hoose, ka hor inta aanad soo sheegin cillad. Meesha biyaha qubeysku galaan ee musquasha waxaa badanaa laga furi karaa xagga hoose ama kor ayaa loo qaadi karaa, si aad u gaarto dufta timaha iyo wixii la mida.
- Haddii ay biyuhu si liidata hoos ugu socdaan, waxaad isticmaali kartaa bambeeyaha saxanka oo aad ku bambeyn kartaa bullaacadda, biyaha hoostooda. Waxed sidoo kale kaalmo ahaan u isticmaali kartaa qorayga iskaalshada lagu tusho si aad u nadiifiso hawa mareenka hoose ee meesha dhardhaqidda.
- Si aad uga fogaato waxyeelleyna bullaacadaha iyo dabiicada, **ha u isticmaalin** bullaacadda kaustiksoda.
- Si aad uga fogaato xannibaadda bullaacadaha, musqusha **ha ku ridin** tambooniga haweenka.

Jikada

- Si marwaxaddu ay ugu shaqeyso sida ugu fiican ee suurta gal ah, hubi inaad nadiifiso fiiltaraha marawaxada ugu yaraan hal mar bishiiba.
Tusaale ahaan, waxaad birtaawo dheer ku shubi kartaa (foornada loogu talagalay) biyo kulul iyo dawada alaabta lagu dhaqo habeenkii oo dhan. Dabadeedna si fiican u biyo raaci.
- Si aad isaga ilaalso in uu xirmo biya-mareenka saxanka alaab dhaqiddu, iska ilaali inaad ku shubto gufarka iyo saliidda cuntada lagu kariyo.

Cayayaanka



- Waa muhiim inaad u soo sheegto Shirkadda guryaha haddii aad guriga ku aragto cayayaan.
- Cayayaanku wuxuu noqon kara quraanjo, dhilqe, baran-baro, booddo
- Ka kirayste ahaan wax lacag ah kuuguma kacayso in waxyaabahaas laga nadiifiyo aqalka
- Waa muhiim in si fiican in badan loo xaaqo guriga si looga fogaado cayayaanka guriga



MAHADSANID DHANKEENNA